Xeerka Qaxootiga 2006


SPECIAL ISSUE

Kenya Gazette Supplement No. 97 (Acts No. 13)

REPUBLIC OF KENYA

KENYA GAZETTE SUPPLEMENT

ACTS, 2006

NAIROBI, 2nd January, 2007

Act—

The Refugees Act, 2006.....

CONTENT

NUQULKA DADWEYNAHA
(SOMALI VERSION)

Waxaa soo wada saarey Dallada Qaxootiga ee Kenya iyo Waaxda Arrimaha Qaxootiga ee Wasaaradda Socdaalka iyo Diiwaangelinta Dadka

Supported by:

Danish Refugee Council

Xeerka Qaxootiga 2006

NUQULKA DADWEYNAHA

(SOMALI VERSION)

Waxaa soo wada saarey Dallada Qaxootiga ee Kenya
iyo
Waaxda Arrimaha Qaxootiga ee Wasaaradda Socdaalka iyo Diiwaangelinta Dadka

Refugee Consortium of Kenya
HAKI HOUSE, Ndemi Road
off Muringa Road, Kilimani
P. O. Box 25340 00603
Lavington, Nairobi
Tel: 254-20-3860418/ 3875614
Fax: 254-20-3874135
www.rckkenya.org

© 2007 Refugee Consortium of Kenya

Contents

Arar *5*

Mahadcelin *5*

Hordhac *7*

Yaa magangalyo doone ah? 7

Yaa qaxooti ah? 7

Yaa noqon kara qaxooti? 9

Yaa u xilsaaran maareynta arrimaha qaxootiga? 11

1. Guddoomiyaha Guddiga Arrimaha Qaxootiga 11

2. Guddiga Racfaanka Qaxootiga 12

3. Guddiga Arrimaha Qaxootiga 12

4. Sarkaalka Xerada Qaxootiga 13

5. Saraakiisha la Magacaabey 14

Nidaamka Hubinta Xaaladda Qaxootinimo 15

Racfaanka 17

Maxaa dhacaya go'aanka kama-dambeysta ah dabadii? 17

Marka uu go'aanku yahay diidmo: in loo diido qaxootinimada 18

Meelahee bey qaxootigu ku noolaan karaan? 19

Ilaalinta Haweenka *22*

Ilaalinta Carruurta 22

Ilaalinta kooxaha nugul 23

Kala noqoshada aqoonsiga qaxootinimada iyada oo loo cuskanaayo sababo nabadgelyo qaran 23

Sirnimada 23

Dembiyada laga geli karo Xeerkan 24

Nidaamyo 25

Hordhac

Xeerka qaxootiga keenya ee 2006 waxa uu ka dhigan yahay bog fiican arrimaha la xiriira maareynta qaxootiga keenya . sida qodobkan ku cad dawlada waxay ku celinaysaa mas,uuliyadeeda guud ahaaneed arrimaha qaxootiga.

Waxaa muhiim u ah dhamaan qaybaha lugta ku leh hawshan inay ogaadaan sharcigan waxa ku qoran sida saraakiisha laanta arrimaha qaxootiga , saraakiisha booliska, saraakiisha socdaalka , qaxootiga, magangalyo doonayaasha iyo hay,adaha la shaqeeya qaxootiga.

Warbixinta bug yarahan laanta arrimaha qaxootiga iyo dallada qaxootiga keenya waxay kusoo gudbinayaan hordhac muhiim ah oo ku saabsan xeerka qaxootiga . buugyarahani waxa uu ka tarjumayaa dadaalka joogtada ah ee dalada qaxootiga keenya iyo laanta arrimaha qaxootigu ugu jiraan sidii loo xaqiijin lahaa dhawridda iyo la socodka xuquuwda qaxootiga iyo in shuruucda keenya si isku mid ah ay ugu hogaansanaadaan muwaadiniinta iyo dadka martida ah.

Peter Kusimba,
Madaxa laanta qaxootiga

Arar

Xeerka Qaxootiga ee 2006 waxaa laga meel mariyey Baarlamaanka bishii Nofembar 2007, waxaana oggolaaday Madaxweynaha bishii Disembar 2006 waxaana si rasmi ah loogu qorey warfaafinta dowladda in uu dhaqan galo 15kii Bishii Maajo 2007. Xeerku waa kii ugu horreeyey ee si gaar ah ugu saabsan arrimaha qaxootiga. Waxaa la meelmariyey 16 sano ka dib markii nuqulkiisii ugu horreeyey la sameeyey 1991. Sharcigan waxa uu bixinayaa qiyaaso iyo nidaam laga raaco dalkan Kenya. Iyada oo ay hoggaanka u hayso Waaxda Arrimaha Qaxootiga, Xeerku waxa uu bixinayaa siyaasad la isugu duwayo dhammaan doorarkii ay ciyaari jireen kooxihii ka mas'uulka ahaa ilaalinta qaxootiga, kuwaas oo ay ku jiraan qaxootiga iyo magangelyo-doonka oo ah kuwa ka faa'ideysanaya adeegga, si loo helo maareyn iyo ilaalin ka wanaagsan sidii hore. Sidoo kale waxa ay isu keeneysaa shuruucdii kala duwanaa ee la xiriirey qaxootiga. Xeerka Qaxootigu waxa uu soo bandhigayaa wejiga cusub ee maareynta qaxootiga ee Kenya. Buug-yarahani waxa uu soo bandhigayaa nuqul fudud oo Xeerka Qaxootiga ah oo si dhaqso ah loo xigan karo kaas oo ay adeegsan karaan qaxootiga, magangelyo-doonka, saraakiisha booliiska, saraakiisha dowladda, saraakiisha ururrada aan dowliga ahayn (NGO-yada) iyo kooxaha kale ee kala duwan ee ku hawlan ilaalinta iyo maareynta qaxootiga.

Mahadcelin

Hay'adda Refugee Consortium of Kenya (RCK) waxa ay ka mahadcelineysaa doorkii ay ka qaateen Eva Ayiera, Simon Konzolo iyo Judy Wakahiu fududeynta Xeerkan iyo diyaarinta buuggan. Waxaa kale oo looga mahadcelinayaa kaalintii firfircoonayd ee ay qaateen. Sidoo kale waxa aan u mahadcelineynaa dhammaan shaqaalaha RCK, iyo Tifaftiraha, Enid Burke.

Waxaa sidoo kale loo mahadcelinayaa kaalintii gaarka ahayd ee ay qaateen shaqiyaadkii ka socdey Waaxda Arrimaha Qaxootiga: Peter Kusimba, Madaxa laanta qaxootiga.Waxaa kale oo aan u mahacelinaynaa hay'adda Danish Refugee Council (Kenya) oo taageeradii maaliyadeed ee ay geysatey uu suurageliyey soo saaridda buuggan.

Hordhac

Kenya, sida dalal kale oo Afrikaan ah, waxa ay martigelisey qaxooti ka soo cararay dagaallo, iskahorimaadyo, iyo xadgudub. Kenya waxa ay sannadkii 1951 wax ka saxiixday axdiga Qaramada Midoobey ee la xiriirey Xaaladda Qaxootiga iyo axdiga Ururka Midowga Afrika ee khuseeyey dhibaatooyinka gaarka ah ee Qaxootiga.

Bishii Nofembar 2006, Kenya waxa ay aggolaatay sharciga qaxootiga ee dalka kaas oo loo bixiyey Xeerka Qaxootiga 2006, kaas oo ku hagayaha dhammaan qaybaha ay khuseyso arrinta – Waaxda Arrimaha Qaxootiga, Booliiska, Waaxda Socdaalka, waaxaha kale ee dowladda, Urrurada aan Dowliga Ahayn (NGO-yada), ururada bulshada, Hay'adaha Qaramada Midoobey iyo qaxootiga -, sida loo waajaho arrimaha Qaxootiga. Buug yarahani waxa uu u soo bandhigayaa si dhaqso ah oo fudud arrimaha muhiimka ah ee ku jira Xeerka si ay u adeegsadaan dhammaan qaybaha.

Yaa magangalyo doone ah?

- **Magangelyo-doone** waa qof yimid Kenya si uu u helo ilaalin, kaas oo ay socoto nidaamkii lagu qiimeynayey xaaladdiisa qaxootinimo.
- Xeerku waxa uu Kenya awood u siinayaa in ay siiso ama u diiddo qaxootinimo qof soo codsaday ilaalin.
- Waxaa muhiim ah in la xusuusnaado in qofka magangelyo-doonka ah uu fasax u haysto in uu joogo inta go'aan kama dambeys ah looga gaarayo arrintiisa.

Yaa qaxooti ah?

Xeerka Qaxootigu waxa uu oranayaa:

> ***"Qof waxa uu noqon karaa qaxooti sharci ah … haddii uu qofkaasi, uu cabsi dhab ah ka qabo in loo dhibaateeyo sababo la xiriira isirkiisa, diintiisa, jinsigiisa, jinsiyaddiisa, xubinimo uu ka yahay koox bulsho gaar ah ama fikir***

siyaasadeed, oo uu joogo meel dibadda ka ah dalka uu u dhashay, oo uusan awoodin ama ay ku dhalisey cabsi, in uusan naftiisa ku aaminin dalkaas, ama

"uusan lahayn dal uu dhalashadiisa haysto oo uu bannaanka ka joogo dalkii uu hore u degganaa, oo uusan awood u lahayn ama ay ku dhalisey cabsi la caddeyn karo oo uu ka qabo in loo dhibaateeyo sababaha [kor] ku xusan oo uusan markaa u noqon karin."

Tani waxa uu macnaheedu yahay in qaxooti yihiin dad:

1. lagu khasbey in ay dalkooda ka soo cararaan oo soo galey Kenya; iyo
2. u soo cararey cabsi dhab ah oo ay ka qabaan halis ay ugu jiraan dhibaato weyn; iyo
3. dhibaatadani in ay ka dhalatey sababo la xiriira isirka, diinta, jinsiga, jinsiyadda, fikirka siyaasadeed ama in ay ka mid yihiin koox gaar ah oo la bartilmaameedsanayo; iyo
4. Markaa cabsidaas ay qabaan daraaddeed ma awoodaan in ay dib ugu noqdaan dalkooda ama dalka ay caadi ahaan ku nool yihiin ee dhibaatadu ka dhacday.
5. Marka lagu jiro xaalad colaadeed, iska-hor-imaadyo, faragelin dibadeed, ama dhacdooyin kale oo si ba'an u carqaladeeya nabadgelyada guud iyo kala dambeynta dalka, waxa ay arrintani ku dhalin kartaa dadka in ay ka cararaan dalalkooda waxaana laga yaabaa in ay yimaadaan Kenya iyaga oo tiro badan. Marka ay arrintaasi dhacdo, Wasiirka mas'uulka ka ah arrimaha qaxootiga ayaa ku dhawaaqi kara in ay dadkaasi yihiin qaxooti. Kooxdan waxaa loo yaqaanaa qaxootiga *"prima facie"*.

Marka la soo koobo: Qaxooti Kenya ku nool waa dadka aan ku heli karin ammaan dalkooda ama dalkii ay ku noolaayeen, kuwaas oo ay Kenya dowladdu ku siisey ilaalin (badbaadin) ilaa xal waara looga helo arrintooda.

Waaxda arrimaha qaxootiga ayaa ka mas'uul ah qiimeynta dhammaan codsiyada qaxootinimada iyo siinta qaxootinimada dadka u qalma in Kenya lagu siiyo ilaalin.

Yaa noqon kara qaxooti?

Xeerka Qaxootigu waxa uu oranayaa in uu qofku **noqon karo** qaxooti haddii uu soo galo Kenya (ha ka soo galo xudduudda ama garoonka diyaaradaha) oo:

- ☞ Ay qabaan cabsi dhab ah oo ay ka baqayaan in dhibaato loo geysto haddii ay ku negaadaan dalkooda ama dalka ay ku noolaayeen; iyo
- ☞ Haddii ay soo waajahayso halis ah in la dhibaateeyo sababtuna ay tahay isirkooda, diintooda, jinsigooda, jinsiyaddooda, fikirkooda siyaasadeed, ama sababta oo ah in ay ka tirsan yihiin koox bulshada ka mid ah oo la bartilmaameedsaday; iyo
- ☞ Haddii ay haystaan cabsi dhab ah taas oo ka hor istaageysa ama ka dhigeysa kuwo aan dooneynin in ay dib ugu noqdaan dalkooda.

Qof waxa uu **waayi karaa** qaxootinimada dalka Kenya haddii:

- ☞ Uu galo dembiyo la xiriira ammaanka, dembiyada dagaalka ama dembiyada ka dhanka ah aadanaha. Dembiyadani waxaa ka mid ah falalka argagaxisinimo, xasuuq ama dil dad fara badan, kufsi dhaca iska hor-imaadyada dhexdooda, taageerada dembiilayaasha dagaalka, iwm; ama
- ☞ Uu ku galey dembi aan ahayn mid siyaasadeed **meel ka baxsan** Kenya ka hor intii aanu u soo gelin dalka qaxooti ahaan; dembiyada aan ahayn kuwo ku dhisan aragtida iyo mabaa'diida siyaasadeed ee qofka, laakiin ah kuwo aad u culus. Tusaale ahaan: ka qaybqaadashada **safrinta carruurta,** addoonsiga carruurta iyo kufsigooda, iwm. Dembiyadu waa in ay ahaadaan kuwo aad u culus, ee aaney ahayn kuwa fudud sida xadidda, ku-xad-gudbidda dhul qof kale leeyahay, iwm.
- ☞ Uu ku galey dembi culus oo aan ahayn mid siyaasadeed Kenya **dhexdeeda** ka dib marka uu dalka u soo galey qaxooti ahaan.
- ☞ Uu qaaday tallaabooyin ka hor imanaya mabaa'diida Qaramada Midoobey ama Midowga Afrika, ama
- ☞ Uu haysto dhalashada dalal mid ka badan (aan Kenya ahayn), laakiin uusan weydiisan ilaalin dalka labaad ka hor inta aanu

imaan Kenya, isaga oo aan u haysan qiil habboon sababta uu sidaa u sameyn waayey.

Qof xaaladdiisu sidan kor ku qoran tahay looma oggolaanayo in uu dalka Kenya ka helo ilaalin qaxootinimo.

> *Tusaale ahaan haddii uu qof haysto laba dal jinsiyaddooda, sida Jabuuti iyo Masar, haddii uu ka soo cararo Jabuuti, waxaa laga filayaa in uu marka hore ilaalin weydiisto Masar, inta uusan imaan Kenya, ama haddii uu tusi karo in haddii uu Masar aado uu halis ugu jiro in loo geysto dhibaato culus.*

Qaxootinimada waxa loola **noqon karaa** ama **la tirtiri** karaa sababahan soo socda:

- ☞ Qofka si iskiis ah ugu noqda dalkiisa oo markaana uu heli karo ilaalinta dalkaa ama
- ☞ Haddii uu lumiyey jinsiyad, oo markaa uu dib u helo oo uu markaana si iskiis ah u oggolaado; ama
- ☞ Uu ka helo jinsiyad cusub dal cusub (tusaale ahaan, marka qaxootiga la dejiyo dalal dibadda ah); ama
- ☞ Dhibaatadii ku keentey in uu dalkiisa ka soo cararo oo dhammaata, oo sidaasna uusan u haysan sabab macquul ah oo uu ku diido in uu ku noqdo dalkiisa; ama
- ☞ Uu haysto ilaalinta dal kale laakiin uu diidayo in uu u baxo dalkaasi isaga oo aan markaan u haysan qiil wanaagsan sababta uu ku diidayo, ama uusan cabsi ka qabin in lagu dhibaateeyo dalkaasi.

Yaa u xilsaaran maareynta arrimaha qaxootiga?

Xeerku waxa uu ka dhigayaa Waaxda Arrimaha Qaxootiga in ay tahay waaxda leh mas'uuliyadda guud ee maamulka, isuduwidda iyo maareynta arrimaha qaxootiga. Waaxda Arrimaha Qaxootiga waxa ay hadda hoos tagtaa Wasaaradda Socdaalka iyo Diiwaan-gelinta Dadka. Xafiisyada lagu dhisey Xeerkan waxa ay yihiin:

1. Guddoomiyaha Guddiga Arrimaha Qaxootiga

Waxa uu yahay/tahay madaxa Waaxda

Waxa uu ka mas'uul yahay/tahay:

- Diyaarinta/horumarinta siyaasado la xiriira arrimaha qaxootiga oo waafaqsan qiyaasaha caalamiga ah.
- Dhiirigelinta xal waara in loo helo qaxootiga ay Kenya magangelisey.
- Kala shaqeynta deeq-bixiyeyaasha iyo hay'adaha kale ee horumarinta hawlaha taageera nabad ku wada noolaanshaha qaxootiga iyo bulshada martigelisey.
- Kala shaqeyta Hay'adaha Qaramada Midoobey iyo Ururrada kale si loo hubiyo in qaxootiga Kenya jooga ay haystaan qalabka iyo adeegyada loogu baahan yahay ilaalinta[1], qaabillidda iyo somafalka
- Qabashada iyo nadaaminta codsiyada qaxootinimada
- Diiwaangelinta dhammaan qaxootiga
- Bixinta aqoonsiyada qaxootinimada iyo waraaqaha safarka
- Diyaarinta shirarka Guddiga Arrimaha Qaxootiga *[hoos ka eeg waxa uu guddigu yahay]*.
- Fulinta go'aamada Guddiga
- Maareynta xerooyinka qaxootiga iyo qalabka/adeegyada la xiriira
- Kala talinta Wasiirka dhinacyada daryeelka iyo wanaagga qaxootiga iyo dib-u-dhiska degaannada martigeliyey qaxootiga
- Kala talinta Wasiirka sidii loogu heli lahaa dhaqaale barnaamijyada taageerada qaxootiga kuwaas oo saameyn wanaagsan ku leh bulshada wax martigelisey, kheyraadka dabiiciga ah iyo deegaankaba.
- Hubinta in kheyraadka degaannada martigeliyey qaxootiga loo isticmaalo si habboon oo waarta.
- Qabashada iyo xiridda qof kasta oo looga shakiyo in uu ku kacayo fal ka dhan ah Xeerkan.

Door aad muhiim u ah oo uu qaato Guddoomiyaha guddigu waa in uu kormeero nidaamka loo qabanayo codsiyada, qaadidda wareysiyada, iyo go'aaminta in qofka loo oggolaanayo in uu qaxooti ka noqdo Kenya. Nidaamkanna waxaa loo yaqaanaa **habka xaqiijinta xaalladda qaxootinimada.** Arrintan waxa aan si faahfaahsan ugaga hadli doonnaa qayb u gaar ah oo buug yarahan ka mid ah.

2. Guddiga Racfaanka Qaxootiga

Guddiga Racfaacka Qaxootigu waa hay'ad madax bannaan oo gaar ka ah Waaxda Arrimaha Qaxootiga. Waxa ay leedahay Guddoomiye iyo xubno uu magacaabey Wasiirka.

- Xeerka Qaxootiga waxa uu u oggolaanayaa magan-gelyo-doonka codsaday qaxootinimo oo misena loo diidey markii ugu horeysey in uu racfaankiisa hor dhigo Guddiga Racfaanka. Guddiga Racfaanku waxa uu dhegeysanayaa codsadaha waxaana uu go'aan ka gaarayaa racfaankiisa.
- Guddiga Racfaanka waxa uu Guddoomiyaha Waaxda Arrimaha Qaxootiga weydiisan karaa xog dheeraad ah oo ku saabsan dacwadda magangelyo-doonka, ama waxa uu dib u sii baari doonaa dacwadda.

3. Guddiga Arrimaha Qaxootiga

Xeerku waxa uu abuurayaa Guddiga Arrimaha Qaxootiga kaas oo ka mas'uul ah in uu kala taliyo Guddoomiyaha arrimaha la xiriira qaxootiga. Guddigu waxa uu ka kooban yahay xubno ka kala socda Wasaaradaha iyo Waaxaha kala duwan ee dowladda. Guddiga saddex meeloodow meel waa in ay ahaadaan haween. Xubnaha guddigu waxa ay ka kala imanayaan:

- Maamulka Gobboladda
- Booliiska
- Wasaaradda ka mas'uulka ah arrimaha qaxootiga
- Wasaaradda ka mas'uulka ah arrimaha dibadda

- Wasaaradda ka mas'uulka ah dowladaha hoose
- Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud
- Wasaaradda ka mas'uulka ah Maaliyadda ama Wasaaradda ka mas'uulka ah Qorsheynta Qaranka
- Waaxda Socdaalka
- Wasaaradda ka mas'uulka ah nabadgelyada gudaha dalka
- Waaxda Sirdoonka
- Waaxda Xafiiska Diiwaangelinta Dadka

Xubnaha Guddigu waxa ay kala talinayaan Guddoomiyaha Guddiga Qaxootiga iyo Waaxda Arrimaha Qaxootiga meelaha ay xubnaha guddigu khibradda iyo xirfadda u leeyihiin.

Xeerku waxa uu sheegayaa in xubin ka socota bulshada wax martigelisey iyo xubin ka socota ururada bulshada (tusaale ahaan Ururrada aan dowliga ahayn – NGO-yada) ka mid ahaanayaan Guddiga si ay u caawiyaan ulana taliyaan guddiga.

4. Sarkaalka Xerada Qaxootiga

Sarkaalka Xerada Qaxootigu waa qofka mas'uulka ka ah xerada qaxootiga. Hawlihiisa gaarka ah waxa ka mid ah:

- Maareynta xerada qaxootiga;
- Qaabilidda iyo diiwaangelinta dhammaan magangelyo-doonka iyo u gudbinta dhammaan codsiyada qaxootinimada xafiiska Guddoomiyaha Guddiga Qaxootiga;
- Hubinta in qaxootiga xerada ku jira la siiyo warqado aqoonsi;
- U maareynta xerada hab kor u qaadaya nadaafadda oo dhowraya deegaanka;
- Isuduwidda hawlaha bixinta nabadgelyada guud, ilaalinta iyo adeegga qaxootiga ku jira xerada;
- Siinta warqad socdaal qaxootiga rajeynaya in ay u safraan meel ka baxsan xerooyinka;

- Ilaalinta iyo gargaaridda haweenka, carruurta iyo kooxaha u baahan kaalmada gaarka ah; iyo
- Hubinta in dhammaan magangleyo-doonka iyo qaxootiga loola dhaqmo si waafaqsan sharciga dalka.

5. Saraakiisha la Magacaabey

Saraakiisha la magacaaabey waa kuwa ka tirsan shaqaalaha dowladda ee uu u oggolaado Wasiirka in ay qabtaan hawlaha Xeerku u dhiibey.

Hawahooda waxaa ka mid ah:

- Ku qaabilidda magangelyo-doonka xarumaha qaabillaadda
- Qabashada codsiyada magangelyo-doonka marka ay yimaadaan iyo u gudbinta codsiyadaas Xafiiska Guddoomiyaha Guddiga Arrimaha Qaxootiga.
- Qaadista faraha, raadka cagta, sawiradda, raajada X (Fallaaraha X) iyo noocyada kale ee xogta elektronigga ee khuseeya qaxootiga iyo magangelyo-doonka iyo qoyskiisa/keeda.
- Wareysi la yeelayashada qaxootiga ama magangelyo-doonka sida uu qabo Xeerka Qaxootiga.
- U baaridda jireed ee qaxootiga, ama magangelyo-doonka, iyo xubnaha qoyskiisa/keeda, laba sababood daraaddood:

    b. Haddii saraakiishu ay haystaan qiil habboon oo ay ku aaminaan in qaxootigan ama magangelyo-doonka uu sameynayo ama u sameyn doonno wax xad-gudub ku ah Xeerka Qaxootiga; ama

    t. Haddii ay haystaan qiil habboon oo ay ku aaminnaan in qaxootiga ama magangelyo-doonka ama qof ka mid ah xubnaha qoyskiisa/keeda ay been sheegayaan ama ay qarinayaan xog ku saabsan xaaladdooda ama cidda ay yihiin.

Saraakiisha la magacaabey waa in ay u hubiyaan in sarkaal lab ah uu baaro labka qaxootiga iyo in sarkaalad dheddig ahi ay baarto qaxootiga dheddig. Saraakiishu waa in ay ixtiraamaan sharafta qaxootiga iyo magangelyo-doonka.

Haddii uusan jirin Sarkaal loo magacaabey oo baaritaanka sameeya, sarkaalku waxa uu weydiisan karaa qof kale in uu sameeyo baarista, laakiin baaristu waa in ay raacdaa xeerkii ahaa in sarkaal lab ah uu baaro labka qaxootiga, oo sarkaalad dheddig ahina ay baarto dheddigga qaxootiga.

Nidaamka Hubinta Xaaladda Qaxootinimo

Hubinta xaaladda qaxootinimo waa nidaamka Waaxda Arrimaha Qaxootigu ay u marto qiimeynta dhammaan codsiyada Kenya looga codsanayo ilaalinta qaxootinimo.

- ☞ Xeerku waxa uu sheegayaa dadka imanaya Kenya iyaga oo raadinaya ilaalin qaxootinimo waa in loo oggolaadaa in ay sidaa sameeyaan haddii ay Kenya ku soo galeen si sharci ah ama si aan sharci ahaynba. Laakiin marka ay dalka soo galaanba, waxaa waajib ku noqonaya in ay joogistooda sharciyeeyaan iyaga oo u tegaya Saraakiisha loo magacaabey hawshaas.
- ☞ Waaxda Arrimaha Qaxootiga ayaa ka mas'uul ah dhisidda Xarumo Qaabbilaad kuwaas oo magangelyo-doonka lagu qaabbilayo laguna diiwaan-gelinayo.
- ☞ Marka uu magangelyo-doonku soo galo Kenya isaga oo raadinaya ilaalin qaxootinimo waajibka ugu horreeya waxa uu yahay in uu u tago Guddoomiyaha Guddiga ama Saraakiisha loo magacaabey diiwaangelinta.
- ☞ Magangelyo-doonku waxa uu haystaa **keliya 30 maalmood** oo ka bilaabata maalintii uu soo galay/gashey in uu gudbiyo joogitaankiisa. Haddii uu magangelyo doonku sameynin arrintan, waxa uu gelayaa/geleysaa dembi waxaana laga yaabaa in la xiro, maxkamad la geeyo oo la ganaaxo ilaa 20,000 Kshs, ama lagu xukumo lix bilood oo xabsi ah, ama la isugu daro ganaaxa iyo xabsiga.
- ☞ Haddii uu/ay leeyahay/leedahay qoys waa in ay dhammaantood u tagaan Saraakiisha loo magacaabey.
- ☞ Magangelyo-doonka iyo qoyskiisa waxaa la diiwaangelinayaa xogtooda waxaana la siinayaa **warqad** (warqad aqoonsi oo la siiyo magangelyo doonka).

- Xubin kasta oo ka tirsan qoyska oo da'diidu ka weyn tahay 18 ayaa laga yaabaa in la siiyo warqadda.
- Mar haddii ay isu diiwaangeliyaan in ay yihiin magangelyo-doon, waxaa laga ilaalinayaa in loo xiro sidii in ay yihiin dad sharci darro ku soo galey dalka. Waxa ay fasax u haystaan in ay dalka joogaan illaa ay ka marayaan nidaamka hubinta xaaladda qaxootinimo.
- Nidaamka hubinta xaaladda qaxootinimo, waxa uu magangelyo doonku marayaa wareysi ay la yeeshaan saraakiisha Waaxda Arrimaha Qaxootiga halkaas oo ay tahay in uu ka soo jeediyo dacwaddiisa/deeda uu/ay ku sharxayo/sharxayso sababta uu uga soo cararey/carartey dalkiisa/keeda iyo sababta aanu/aaney dib ugu noqon karin dalkiisa/dalkeeda.
- Saraakiisha Waaxda waxa ay qorayaan/duubayaan waxa uu magangleyo-doonku sheego, waxaana ay ku qaadanayaan xoogaa muddo ah oo ay dib ugu eegaan dacwadda ayna ku xaqiijiyaan xaqiiqooyinka. 90 maalmood gudahooda, Guddoomiyuhu waa in uu bixiyaa go'aan uu ku sheegayo in magangelyo-doonka la siiyey ama loo diiddey in uu qaxooti ku noqdo Kenya.
- Magangelyo-doonku waxa lagu ogeysiinayaa go'aanka isaga oo qoran muddo 14 maalmood gudahood ah oo ka bilaabata maalinta uu guddoomiyuhu go'aanka gaaro. Haddii qof loo diido xaalad qaxootinimo, warqaddu waxa ay sidoo kale sharxaysaa sababta loogu diidey qaxootinimada iyo fursadda uu u haysto in uu go'aanka ka qaato racfaan.

Racfaanka

- Haddii codsiga magangelyo-doonka la diido marka koowaad, waxa uu/ay arrinta u gudbin karaa/kartaa Guddiga Racfaanka.
- Magangelyo-doonku waa in uu ugu gudbiyaa racfaankiisa Guddiga Racfaanka **30 maalmood** oo ka bilaabata maalinta uu heley/heshey go'aanka loogu diidayo qaxootinimada.

- Guddiga Racfaanka waa uu wareysan karaa codsadaha waxaana uu ka gaarayaa go'aan. Guddigu waxa uu u gudbinayaa go'aankiisa oo qoran magangelyo-doonka.
- Haddii go'aanka Guddigu Racfaanku uu yahay diidmo, magangelyo-doonku waxa uu dooran karaa in uu mar labaad racfaan u qaato Maxmakadda Sare ee Kenya. Waa in uu markaa ku gudbiyaa codsigiisa **21 maalmood** gudahooda oo ka bilaabata maalinta uu ka helo go'aanka diidmada ah Guddiga Racfaanka.
- Muddadan, waxa uu Xeerku ka oranayaa in magangelyo-doonku uu dalka ku joogo si sharci ah ilaa uu ka helo/hesho go'aanka kama dambeysta ah ee dacwaddiisa/deeda la xiriira/ta.

Maxaa dhacaya go'aanka kama-dambeysta ah dabadii?

Marka uu go'aanku yahay oggolaansho: la oggolaado xaalladda qaxootinimo ee qofka

- Dadka soo codsaday ayaa loo aqoonsaday qaxootinimo waxaana ay fasax u haystaan in ay ku noolaadaan Kenya oo ayna helaan ilaalin qaxootinimo ilaa ay si nabadgelyo ah ugu noqon karaan dalkooda, ama ay helaan dal kale oo dib-u-dejin siiya amaba ay helaan xal kale oo waara.
- Xubnaha kale ee qoyska ka tirsan waxa ay sidoo kale fasax u haystaan in ay ku negaadaan Kenya haddiiba xubnahaasi ay joogeen Kenya markii qofka la siinayey ilaalinta qaxootinimo.
- Qaxootigu waxa ay helayaan warqad aqoonsi qaxootinimo. Xubnaha qosyka ee da'doodu ka weyn tahay 18 sano kuwaas oo ku tiirsan qof qaxooti ah oo iyagana qaxootinimada ku heley qofkaas ay ku tiirsan yihiin waxa la siinayaa warqad aqoonsi qaxootinimo oo iyaga u gaar ah.

- Qaraabada kale ee ku tiirsan qofka qaxootiga ah ee soo galey Kenya ka dib marka uu qofka qaxootinimada loo aqoonsaday waa in ay goonidooda sida caadiga ah isugu xaadiriyaan oo ay codsadan qaxootinimo ayagoo maraya nidamka saxda ah. Guddoomiyaha guddiga qaxootiga ayaa qiimeyn doona codsigooda oo fasax u siin kara in ay ku negaadaan Kenya iyaga oo qaxooti ah oo sidaa daraadeedna ay ku biiraan xubnaha kale ee qoyska qofka qaxootiga ah oo hore qaxootinimada loogu aqoonsaday.

- Haddii nin iyo naag is qaba ay kala tagaan ama is furaan, oo uu ninku yahay kan loo aqoonsaday qaxootinimada, haweeneydu waxa ay iyaduna haysanaysaa qaxootinimadeeda. Sidaa si la mid ah haddii haweeneydu tahay tan la aqoonsaday, ninku waxa uu sidoo kale haysanayaa qaxootinimadiisii marka ay kala tagaan.
- Haddii uu ninku dhinto, haweeneydu waxa ay haysaneysaa qaxootinimadeeda, haddii ay naagtu dhimatana, ninku waxa uu haysanayaa qaxootinimadiisii.

Marka uu go'aanku yahay diidmo: in loo diido qaxootinimada

- Magangelyo-doonku waxa uu u racfaan qaadan karaa Guddiga Racfaanka. Haddii go'aanka uu markan noqdo diidmo, waxa uu u racfaan qaadan karaa Maxkamadda Sare ee Kenya. Haddii go'aanka Maxkamadda Sare uu noqdo diidmo, waa in uu/ay u diyaar garoobaa/garowdaa in uu dalka kaga baxa/baxdo **90 maalmood gudahooda** oo ka bilaabata maalinta uu soo baxo go'aanka diidmada ee kamadambeysta ah.
- Haddii qof magangelyo-doon ah uusan ka qaadan racfaan go'aan diidmo ah marxaladda ay doontaba ha ahaatee, markaa go'aaanka ugu dambeeya ee uu helo/ay hesho ayaa loo qaadanayaa in uu yahay go'aanka kamadambeysta ah. Marka ay dhammaato muddadii loogu talogalay in racfaanka lagu qaato, magangelyo-doonku waa in uu u diyaar garoobaa in uu dalka Kenya kaga baxo muddo 90 maalmood gudahood ah. .
- Haddii lagu dhex arko Kenya 90 maalmood ka dib iyaga oo aan markaa haysan qiil wanaagsan ama waraaqihii u habboonaa, waa la xiri karaa lana hor geyn karaa maxkamad iyaga oo ku eedeysan in ay yihiin soogalow sharci darro ah.

Meelahee bey qaxootigu ku noolaan karaan?

- Wasiirka ayaa u xulan kara goobo Kenya ka tirsan in laga dhigo xarumo ku meel gaar ah oo u ahaada meelo si ku meel gaar ah ay ugu noolaadaan magangelyo-doonka ama meelo laga dhiso xerooyin qaxooti. Haseyeeshee, Wasiirku waa in uu kala hadlaa arrintan bulshada degaanka ee martida loo yahay ka hor inta aan la dhisin xero ama xarun ku meel gaar ah.

- ☞ Dowladda iyo ururrada bani'aadamnimada ayaa ka wada shaqeynaya bixinta cuntada, hoyga, gargaarka daawada, iyo baahiyaha kale ee lagamamaarkaanka ah ee la siinayo xerooyinka iyo xarumaha ku meelgaarka ah.
- ☞ Waa mas'uuliyadda Guddoomiyaha isaga oo u maraya Sarkaalka Xerada Qaxootiga in uu hubiyo in xerooyinka loo maareeyo si ilaalinaysa deegaanka oo isla markaana ilaalinaysa wanaagga qaxootiga iyo bulshada martigelisayba.
- ☞ Guddoomiyaha ayaa sidoo kale mas'uul ka ah dhiirigelinta xiriir nabadgelyo iyo mid saaxiibtinimo oo dhex mara qaxootiga iyo dadka martigeliyey, meel kasta oo ay ku nool yihiin.
- ☞ Qaxootigu waxa ay oggolaansho ka heli karaan Sarkaalka Xerada Qaxootiga si ay ugu noolaadaan xerada bannaankeeda.

Xuquuqaha iyo Waajibaadka muhiimka ah ee qaxootiga ku nool Kenya

Qaar ka mid ah waajibaadyada muhiimka ah ee qaxootiga iyo magangelyo-doonka waxa ay yihiin:

- ☞ Qaxooti kasta iyo magangelyo-doone kasta waxa waajib ku ah in uu raaco sharciga dalka Kenya.
- ☞ Magangelyo-doone kasta waxaa ku waajib ah in uu diiwaangeliyo joogistiisa uu joogo Kenya.
- ☞ Qaxootiga iyo magangelyo-doonka waxaa waajib ku ah in nabadgelyo dhexdooda ku wada noolaadaan oo ayna kula noolaadaan bulshooyinka martigeliyey.
- ☞ Qaxooti iyo magangelyo-doone kasta waxaa waajib ku ah in uu ilaaliyo deegaanka uuna hubiyo in hawlahooda aaney dhibaato u geysan deegaanka.
- ☞ Qaxootiga iyo magangelyo-doonka waa in aaney lug ku yeelan fallaaganimo, kacaan ama hawlo militeri oo ay ka fuliyaan meelo xuduudda dibadda ka ah inta ay ugu nool yihiin Kenya qaxooti ama magangelyo-doone ahaan.
- ☞ Qaxootiga iyo magangelyo-doonku waa in aaney ku lug yeelan ama dhiirigelin dembiyada Kenya dhexdeeda.

- Qaxootiga iyo managelyo-doonku waa in ay qaadaan tallaabooyin ay ku cusbooneysiinayaan waraaqaha sharciga ee muddadooda dhammaatey.
- Qaxooti kasta iyo magangelyo-doone kasta waxa ku waajib ah in marka uu soo bandhigo dacwaddiisa uu bixiyo xog run ah waana in uusan been u sheegin Saraakiisha la Magacaabey iyo saraakiisha kaleba. Marka ay qaadayaan warbixintooda.

Qaar ka mid ah xuquuqaha muhiimka ah ee qaxootiga iyo magangelyo-doonka waxa ay yihiin:

- Magangelyo-doone kasta waxaa uu xaq u leeyahay in la dhegeysto codsigiisa loogu tixgelinayo qaxootino uu ku helo Kenya.
- Magangelyo-doone kasta waxa uu xaq u leeyahay in aan *la-baylahin* (*non-refoulement)*, tani oo micnaheedu yahay, xaqa uu u leeyahay in aan laga hor-istaagin soo gelidda Kenya marka ay noloshoodu halis ku jirto iyo in aan khasab dib loogu dirin meel ay noloshoodu halis ku geleyso.
- Xubnaha qoyska qofka qaxootiga ah ee la jooga Kenya waxa ay xaq u leeyihiin ilaalinta qaxootinimo sababta oo ah waxa ay ku tiirsan yihiin qofka qaxootiga ah ee la siiyey qaxootinimada. Arrintan waxa loo yaqaanaa "**xaaladda ku xiriirsannaanta–*derivative status".***
- Xubnaha qoyska waxa ay xaq u leeyihiin in ay sii haystaan qaxootinimadooda xitaa haddii qofka la siiyey qaxootinimada uu furo ama ka tago iyaga, ama haddii qofku uu dhinto.
    - Laakiin haddii qaxootinimada la siiyey qofkaa ay dowladdu kala noqoto, qaxootinimada xubnaha kale ee qoyska iyana waa lala noqdey. Xaaladdu marka ay sidan tahay, xubnaha qoyska waxa ay si gooni-gooni ah mar kale u codsan karaan qaxootinimo.
    - Qofka lala noqdey qaxootinimaddiisa kuma tiirsanaan karo codsiyada cusub ee ay sameeyeen xubnaha qosykiisa si uu u sii joogo Kenya.
- Magangelyo-doone kasta waxa uu xaq u leeyahay in Kenya uu joogo ilaa go'aankiisa/keeda ugu dambeeya ee dacwadiisa/

deeda la helo. Tani waxaa sidoo kale ku jira xuquuqda uu u leeyahay in aan loo xirin soo-galow sharci darro ahaan.

- ☞ Qaxooti kasta iyo magangelyo-doone kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu helo warqad aqoonsi.
- ☞ Qaxooti kasta waxa uu xaq u leeyahay shaqaalenimo uu ujro ku qaato, si la mid ah xuduudaha u yaalla dadka aan u dhalan Kenya.
- ☞ Qaxooti kasta waxa uu helayaa xuquuqaha waxaana qabanaya waajibaadyada ku qoran heshiisyada caalamiga ah ee ay Kenya saxiixday.

Ilaalinta Haweenka

- ☞Haweenka qaxootiga iyo magangelyo-doonka ah waxa ay xaq u leeyihiin nabadgelyo iyo ilaalin ay ku helaan xerooyinka dhexdooda. Guddoomiyaha ayaa ka mas'uul ah in uu hubiyo in tallaabooyin gaar ah la qaado si loo hubiyo nabadgelyada haweenka qaxootiga iyo magangelyo-doonka ah.
- ☞ Haweeney kasta oo magangelyo-doon iyo qaxooti ah oo ka weyn 18 sano jir waxa ay xaq u leedahay waraaqaheeda aqoonsiga ee u gaarka ah oo ay siiso Waaxda Arrimaha Qaxootiga. Xaaska la qabo waxa ay xaq u leedahay in ay hesho aqoonsi u gaar ah oo gooni ka ah kan ninkeeda, si la mid ah sida uu ninku xaq ugu leeyahay in uu helo warqad aqoonsi oo gaar ka ah kan xaaskiisa.

Ilaalinta Carruurta

- ☞ Ilmo kasta magangelyo-doon ama qaxooti ah waxa uu xaq u leeyahay ilaalin iyo gargaar. Guddoomiyaha Guddiga Arrimaha Qaxootiga waa in uu hubiyaa in la qaado tallaabooyin gaar ah oo lagu ilaaliynayo carruurta qaxootiga iyo magangelyo-doonka ah ee ku nool xerooyinka.
- ☞ Ilma kasta oo magangelyo-doon iyo qaxooti ah oo aan lala socon waxa uu xaq u leeyahay in laga caawiyo raadinta waalidkii ama xubnaha kale ee qoyskii.
- ☞ Marka la helo waalidka ama qaraabada, ilmo kasta waxa uu xaq u leeyahay in lagu caawiyo in uu dib ula midoobo qoyskiisa/keeda. Waaxda Qaxootiga waxa ay ka mas'uul tahay in ay kala shaqeyso waaxaha iyo ururada kale dhiirigelinta xuquuqdan.

- Haddii waalidka ama qaraabada ilmaha aan la heli karin, ilmaha waxa uu xaq u leeyahay in la siiyo ilaalintii uu heli lahaa ilmo Kenyan ah oo aan qoys lahayn.

Ilaalinta kooxaha nugul

- Kooxaha nugul sida naafada, waayeelka (rag iyo haweenba) waxa ay u baahan yihiin ilaalin gaar ah oo bulshada dhexdeeda ah. Sida ay qabaan Nidaamyada Xeerku [eeg qaybta nidaaminta], Waaxda Arrimaha Qaxootiga ayaa ay mas'uuliyad ka saaran tahay in ay hubiso in ay kooxaha nugul helaan gargaar u habboon xaaladdooda.

Kala noqoshada aqoonsiga qaxootinimada iyada oo loo cuskanaayo sababo nabadgelyo qaran

- Guddoomiyaha waaxda arrimaha qaxootiga ayaa kala noqon kara qaxootinimada qof haddii ay jiraan sababo aad u xooggan oo tilmaamaya hawlaha qofkan ama joogiddiisu ay saameyn ku yeelanayso nabadgelyada qaran ee Kenya.
- Iyada oo arrintan laga duulayo, Wasiirka ayaa amar ku bixin kara tarxiilka qaxootiga, magangelyo-doonka ama xubnaha qoyska haddii qofkaasi loo qaato in uu halis ku yahay nabadgelyada qaran ee Kenya.
- Wasiirka waa in uu kala hadlo arrinta Wasiirka kale ee mas'uulka ka ah nabadgelyada qaranka, waa in uu raacaa nidaamkii saxda ahaa iyo sida uu sharcigu qabo (oo loo yaqaanno **habka raacidda sharciga**) ka hor inta aanu amar ku bixin tarxiilidda qaxootiga ama magangelyo-doonka.

Sirnimada

- Waa waajibaad saaran dhammaan dadka ka shaqeeya Waaxda Arrimaha Qaxootiga ama loo magacaabey in ay shaqeeyaan iyaga oo wakiil ka ah Waaxda in aaney soo bandhigin iyaga oo aan oggolaansho haysan xogta la xiriirta qaxootiga ama magangelyo-doonka.

- ☞ Haddii ay tahay in ay soo bandhigaan xog, waa in ay waafaqsan tahay shaqadooda waana in ay oggolaansho ka haystaan Guddoomiyaha Waaxda.
- ☞ Haddii ay dadka u soo bandhigaan xog aanay oggolaansho u haysan in ay xogtaan helaan, waa la xiri karaa, maxkamad la hor geyn karaa, laguna ganaaxi karaa 20,000 Kshs ama lagu xukumi karaa xabsi ilaa 6 bilood gaaraya, ama la isugu dari karaa ganaax iyo xabsi.

Dembiyada laga geli karo Xeerkan

Waxaa jira falal xadgudub ku ah Xeerka. Xeerku waxa uu sheegayaa in qof la ganaaxi karo 20,000 Kshs ama lagu xukumi karo xabsi gaaraya ilaa 6 bilood, ama labadaba la isugu dari karo, haddii:

- Aaney soo sheegin joogistooda ama aaney diiwaan gelin raadsan 30 maalmood oo ka soo bilaabata maalintii ay soo galeen Kenya; ama
- Iyaga oo og ay siiyaan xog been ah Saraakiisha la Magacaabey; ama
- Si ulakac ah u marin habaabiyaan Saraakiisha la Magacaabey marka ay saraakiishu u qabanayaan hawshooda si waafaqsan Xeerka; ama
- Aanay ka tegin Kenya iyada oo Wasiirku bixiyey amar looga tarxiilayo Kenya sababo la xiriira nabadgelyada qaranka; ama
- Aaney ka tegin Kenya in kasta oo codsigoodii qaxootinimo lagu diidey go'aankii u dambeeyey oo markaana ay joogaan Kenya 90 maalmood oo ka dambeysa goortii ay heleen go'aankii kama dambenta ahaa oo aaney haddana haysan qiil habboon; ama
- Aaney ahayn qaxooti, aanay waxba ka haysan waraaqaha aqoonsiga rasmiga ah ee qaxootinimo oo aaney markaana raacin amarkii Wasiirka ee ahaa in ay ka baxaan Kenya;
- Ay ku nool yihiin meelo ka baxsan goobihii loo cayimey qaxootiga iyaga oo aan haysan oggolaansho.

Nidaamyo

Wasiirka ayaa u dejin kara nidaamyo lagu wanaajinayo habka shuruudaha Xeerka loo fulinayo. Nidaamyada waa xeer-hoosyaadyo ay dejisey wasaarad si loo hubiyo in mabaa'diidii Sharci ee uu dejiyey Baarlamaanku lagu dabaqo hawl-maalmeedka.

Waaxda Arrimaha Qaxootiga waxa ay diyaarisey Nidaamyo sheegaya wadiiqooyinka loo marayo:

- Qaabilidda iyo diiwaangelinta qaxootiga, iyo habka la marayo marka la codsanayo aqoonsi qaxootinimo oo laga helo Kenya;
- Bixinta waraaqo la siinayo qaxootiga, oo ay ku jiraan waraaqaha aqoonsiga, kuwa safarka iyo kuwo kaleba.
- Maareynta meelaha loo qoondeeyey ee ay qaxootigu ku nool yihiin (xerooyinka iyo xarumaha ku meel-gaarka ah);
- Ilaalinta qaybaha kala duwan ee qaxootiga: ragga, haweenka, dhalinyarada, carruurta, ilmaha aan lala socon, dadka naafada ah iyo waayeelka.

Nidaamyadu waxa ay sidoo kale u oggolaadaan magangelyo-doonka ama qaxootiga in uu helo talo dhinaca sharciga ah ama wakaalad. Waa in uu go'aankeeda gaaraa qofka qaxootiga ah ee doonaya in uu helo talo dhinaca sharciga ah oo uu diyaarsado/diyaarsato adeeggan.

1. Ilaalintu waa arrin ballaaran. Waxaa ku jira ilaalinta dhinaca sharciga (bixinta waraaqo aqoonsi iyo dukumentiyada kale ee rasmiga ah oo la siiyo qaxootiga iyo magangelyo doonka, ka ilaalinta in loo xiro sidii in uu qofku yahay soogalooti sharci darro ah, iwm); waxaa kale oo ku jira in qofka jirkiisa iyo ammaankiisa la ilaaliyo, ka haqab-beelka cuntada, helidda adeegyada caafimaadka, iyo kuwo kale.

Annex 1.

Service Charter of the Refugee Affairs Department 2007 - 2008

No	Service rendered	User charge	Time line
1.	Registration of asylum seekers	Nil	1 day
2.	Maintaining an appropriate registration and documentation system for refugees	Nil	Weekly
3.	Issuing identification cards to bonafide refugees	Nil	3 months
4.	Issuing movement passes to refugees residing in Kakuma and Dadaab camps	Nil	3 days
5.	Processing of Conventional Travel Documents	Nil	15 days
6.	Processing of applications for exit stamps	Nil	5 days
7.	Response to refugee complaints	Nil	7 days
8.	Holding consultative meetings with implementing partners	Nil	1 day
9.	Response to urgent correspondence	Nil	3 days
10.	Processing of applications to visit refugee camps	Nil	14 days

Courtesy of the Department of Refugee Affairs, Ministry of State for Immigration and Registration of Persons